



## XAFIISKA QARAMADA MIDOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Faafin Degdeg ah

**WAR SAXAAFADEED 37 /2014**

### **Ergeyga Qaramada Midoobay ee Soomaaliya oo soo dhoweeyay Ximan iyo Xeeb oo saxiixay heshiiska ku talagalka maamul cusub loogu sameynayo gobollada dhexe ee Soomaaliya**

**Mogadishu**, 6 Agoosto 2014 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya (SRSG), Nicholas Kay, ayaa soo dhoweeyay Ximan iyo Xeeb oo ku biiray oo saxiixay heshiiska mabda’ ahaan lagu dhisayo maamul goboleed ay yeeshaan gobollada dhexe ee Soomaaliya.

Dhinacyada wada galay heshiiska, oo billowgii ay saxiixeen dhinacyada kale ee ay arrintu khuseyso 30kii bishii Luulyo, waxay isku afgarteen inay ka wada shaqeeyaan sidii maamul cusub looga dhisi lahaa gobollada dhexe ee Soomaaliya.

“Waxaan soo dhoweynayaa maamulka Ximan iyo Xeeb oo ku biiray oo saxiixay heshiiskan oo ah tallaabada kowaad ee hanaanka maamul goboleed loogu sameynayo gobollada dhexe ee Soomaaliya,” ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah Nicholas Kay. “Waxaan dhammaan saxiixayaasha saddexda ah iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya ugu hambalyaynayaa horumarka muhimka ah ee loo qaaday dhanka nabadda iyo dowlad-dhiska”.

“Waxaan dhinacyada heshiiska wada galay ugu baaqayaa inay wadatashi wax ku ool ah iyo dibuheshiisiin la yeeshaan dhammaan dhinacyada ay arrintu khuseyso, iyadoo xaqiijinaya in la ilaaliyo danaha maamullada hadda sameysmaya iyo kuwa horeyba u jiray,” ayuu raaciyay. “Qaramada Midoobay, oo goobjoog ka ah heshiiska, waxaa ka go’an inay taageerto hirgelintiisa iyo ujeedooyinka guud ee ay Soomaaliya ka leedahay nabadaynta iyo dowlad-dhisidda,” ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah Nicholas Kay.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta Aleem Siddique

Tel: +254 41 350 6603 • Email: [unsom-spokesperson@un.org](mailto:unsom-spokesperson@un.org)

Fadlan eeg rugta Internet-ka:

[www.unsom.unmissions.org](http://www.unsom.unmissions.org) • [@UNSomalia](https://twitter.com/UNSomalia) • [facebook.com/UNSomalia](https://facebook.com/UNSomalia)